# Mashruuca horumarinta nabadgelyada Park iyo Porland

## Kulanka Soo Bandhigga ee Wajiga 2

Shaqaalaha mashruucu waxa ay kulan dadweynaha u furan 13kii Febraayo 2025 ku qabteen United Methodist Church ee Minneapolis. In ka badan 65 ayaa ka qeyb qaatay kulanka. Ujeedada kulanka furan waxa ay aheyd in dadweynaha lala wadaago naqshadda horudhaca ah iyo ra'yiga dadweynaha.



Maamulaha mashruuca ee Degmada Hennepin waxa uu ka qeyb galayaasha u soo bandhigay naqshadda horudhaca ah ee lagu talinayo.

## Sidee ayaa dadka lagu gaarsiin karaa

Si dadka loo gaarsiiyo mashruuca iyo kulamada, waxa aanu adeegsanay wacyi gelin lagu gaarsiiyo oo ay ka mid yihiin:

- Boostada
- Foomka ra'yiga
- Taleffon lagu waco
- Ka qeyb gelinta suurogalka ah
- Xogta ugu dambeysa ee barta
- Iimeyl
- Kulamo bulshada

## Sidee ayaan ku soo ururinaa ra'yiga dadweynaha

ka qeyb galayaasha waxaa la siiyey fursad ay ra'yigooda kaga dhiiban karaan mashruuca iyo naqshadda horudhaca ah hababka soo socda:

- Kaararka ra'yi dhiibashada
- Ra'yi dhiibashada naqshadda
- Shaqaalaha oo ay afka uga sheegaan

**Waxyaabaha** | Wadar dhan **94 ra'yi dhiibasho naqshadda** iyo **22 kaararka ra'yi**

### *Qodobada Aasaaska u*

SPEED LIMIT 30

**Dareenka laga qabo nabadgelyada iyo xawaaraha gaadiidka**

*"Dareenka ugu badan waa xawaaraha . Dhamaan inta laga hadlay. Bushkuleetiyad, goobaha gaadiidka la dhigto, caruurta."*

**Wax ka qabashada dareenka laga qabo gawaarida**

*"Kala qeybiye dhexe oo lagu xiro waxa ay ka dhigan tahay in wadayaasha aan mas'uulka aheyn ay xaafadaha iyo wadooyinkooda ku wada gaadiidka."*

**Taageerada khad u gaar ah bushkuleetiyada iyo dadka ka talaabaya wadooyinka**

*"Waxa aan deganahay 37aad iyo Portland waanan jecleystay qorshahan! Bushkuleeti ayaan leeyahay oo hadana aad u lugeeya. Farxad baan la duulayaa. Arrintan farqi balaaran ayey u sameyneysaa qoyskayga soo koraya."*

*"Fadlan naqshadda ku dar in bushkuleetiyada la arki karin oo aysan qarin gawaarida wadada dhinaceeda la dhigay."*

### *Qodobada kale*

**Talaabooyinka lagu yareynayo xawaaraha gawaarida**

Waxyaabaha lagu talinayo waxaa ka mid ah kala qeybiye, wareeg gawaaridu ku wareegto, iyo gudubka dhulka ee xaawaraha yareeya gaar ahaan agagaarka dugsiyada, jardiinyooinka iyo goobaha shilalku ku badan yihiin.

**Nalalka iyo aragtida gaadiidka**

Dadka qaar ayaa soo jeediyey baahida loo qabo nalalka wadooyinka iyo in si wanaagsan loo arki karo goobaha laga talaabo, iyo horumarinta nabadgelyada isgoysyada.

**Socodka gaadiidka iyo wax ka bedelka khadka gaadiidka**

Dadka qaar baa su'aalo ka soo jeediyey dib u qaabeynta khadka gawaarida, waqtiga nalalka wadooyinka, iyo haddii wadooyinka dib loo calaamadeyn karo si loo maareeyo gaadiidka sida ugu haboon.

**Ka Qeyb gelinta bulshada**

Waxaa jira codsiyo ku wajahan in bulshada aan afka Ingiriisiga ku hadal laga qeyb geliyo wacyi gelinta iyo bulshada degan waqooyiga Wadada Lake si loo xaqiijiyo in qorshaha loo dhan yahay.

## La soo xiriir kooxda mashruuca

Olagoke Afolabi | Maamulaha Mashruuca, Degmada
olagoke.afolabi@hennepin.us
Hennepin.us/park-portland
612-596-0311

Hennepin